



## Hakinta Talaalka Johnson & Johnson ee COVID-19: Waxa aad u baahantahay inaad ogaato

Talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson waxaa lagula taliyaa dadka da'doodu u dhaxayso 18 iyo kasii wayn. Waxaad keliya u baahan tahay inaad hal kuuro ka qaadato talaalka Johnson & Johnson si aad u hesho difaaca ka dhanka ah COVID-19.

### Xog ku saabsan hakinta

Isticmaalka talaalka Johnson & Johnson ayaa la hakiyay si xog looga helo sida loo ogaado loona daaweeyo cilada dhanka dhiig xinjirowga. Intii lagu jiray hakinta, khubarada caafimaadka ayaa dib u eegis ku sameeyay xogta talaalka waxayna ogaadeen in faa'iidooyinka talaalkaan ay ka badan yihiin khatartiisa aadka u yar. Dhiig xiranka ayaa ah mid la daawayn karo, laakiin dhakhaatiirtu waa inay ogaadaan sida lagu aqoonsanaayo, sida loo soo sheegaayo, iyo sida loo daawaynaayo.

### Qaadashada talaalka Johnson & Johnson

- Waa muhiim in haweenka, gaar ahaana kuwa ka yar da'da 50 sano jirka, ay iska eegaan astaamaha ka imaan kara talaalka ee dhiig xinjirowga. Muddo sadex asbuuc ah kadib talaalkaaga, iska fiiri:



- Neefta oo kuyaraata



- Xabad xanuun



- Lugo barar



- Xanuunka caloosha/ubucda oo aan kaa ba'ayn



- Madax xanuun daran ama madax xanuun aan kaa ba'ayn



- Arag caad saaran yahay



- Nabar si fudud kaaga soo baxaaya ama finan dhiig leh oo yaryar oo ka muuqda maqaarka ka danbeeya meesha cirbada lagaaga muday.

- Haddii aad yeelato ciladahaan, aad qolka xaalada degdega ah ama daryeelka degdega ah ee kuugu dhow. U sheeg dhakhtarka inaad dhawaan qaadatay talaalka Johnson & Johnson.
- Astaamahaan ayaa qaata muddo dheer inay soo muuqdaan wayna ka daran yihiin astaamaha kale ee caadiga ah, kuwaasoo dhaca hal ilaa labo maalmood kadib talaalka waxayna socdaan keliya dhawr maalmood.

**Haddii aad qaadatay talaalka Johnson & Johnson wax ka badan hal bil kahor, waxay u badan tahay inaad qaado ciladaan.**

### Bulsho kasta ayaa heli karta dhammaan talaallada COVID-19

Dhammaan dadka Minnesota ayaa haysta dookh ay ku xushaan talaalka ay doonayaan inay qaataan.

Dhammaan bulshooyinka ayaa helaaya dhammaan sadexda talaal oo yaala xarumaha badan ee kaladuwan ee talaalka. Waxaad sidoo kale ka raadin kartaa oonleena ama waxaad wici kartaa si aad u waydiiso nooca talaalka lagu baxsho xarun talaal oo gaar ah.

# Khataraha iyo faa'idooyinka

Faa'idooyinka talaalka Johnson & Johnson ayaa ka badan khatartiisa yar.



**Khatarta:** Haweenka ka yar 50 sano waa inay iska eegaan khatarta xoogaa dheeraadka ah ee cilada dhiig xinjirowga. Khatartaan ayaa aad ugu yar haweenka jira 50 sano jir iyo ka wayn iyo ragga dhammaan da'aha.



**Faa'idooyinka:** Talaalka Johnson & Johnson ayaa aad ugu wanaagsan kahortaga xanuunka daran ee, isbitaal dhigista, iyo dhimashada uu sababo COVID-19. Keliya hal kuuro ayaa loogu baahan yahay si aad u hesho difaac buuxa. Waa farsamo muhiim u ah joojinta aafada COVID-19.

## Badqabka Talaalka

Talaallada COVID-19, oo uu ku jiro Johnson & Johnson, ayaa si degdeg ah lagu sameeyay maadaama ay jirtay maal gelin iyo khayraad dheeraad ah, iyo cilmi baaris hore. Waa muhiim inaad ogaato in talaabooyinka lagu hubinaayo badqabka aan laga boodin. Helitaanka talaallada COVID-19 oo amaan ah oo shaqaynaaya ayaa ah muhiimada koobaad. Cilmi baarayaasha caafimaadku waa inay cadeeyaan in xogta daraasada talaalku muujisay in talaaladu badqab leeyihiin ayna shaqaynayaan kahor intaan isticmaalkooda la fasixin.

- Saraakiisha caafimaadka ayaa adeegsada nidaamyo kaladuwan si ay ula socdaan dhammaan talaallada COVID-19 si loo hubiyo badqabka kadib marka ay ogolaato Maamulka Cuntada iyo Daawada.
- Nidaamyadaan waxay aqoonsan karaan haddii ay jiraan cilado aan horay loo ogaan oo aad dhif u ah oon la helin intii tijaabooyinka caafimaadka la waday.
- Khubarada ayaa dib-u-eegaya waxna ka qabanaya walaacyada badqabka isla markaaba.

Waxaan ku talinaynaa in dadku is-talaalaan markay fursad u helaan. Khubaradu waxay aqbalayaan in dhammaan talaallada COVID-19 ay gacan kaa siinayaan kahortaga cudurka, gaar ahaana xanuun daran iyo dhimashada.



## Wax su'aalo ah maqabtaa?

Mid kamid ah waxyaabaha ugu fiican ee aad uga bogan karto su'aalaha talaalka waa inaad la hadasho dhakhtarkaaga koowaad ama bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaadka. Waxay kuu sheegi karaan xog waxayna kaa caawin karaan inaad xogta ku dabaqdo nololaha iyo xaaladahaaga nololeed. Haddii talaalka COVID-19 Johnson & Johnson uusan kugu haboonayn, dookhyada kale ee talaalka ayaad heli kartaa kuwaasoo aan lagu arag khatarta dhiig xinjirowga.

**mn** MINNESOTA

[mn.gov/vaccine](https://mn.gov/vaccine)

Minnesota Department of Health | [health.mn.gov](https://health.mn.gov) | 651-201-5000 | 625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975  
La xariir [health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us) si aad u codsato xogta oo qaab kale ah. (Somali)

5/28/2021